A Message from

# The Workforce Growth, Quality, and Recognition Team

Washington State Department of CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

## Wargayska PD!



*Taageerida macalimiinta waaweyn ee daryeela waxna bara caruurta yaryar ee Washington State.*

Wargayskaan sadexdii biloodlaha ah ee Washington State Department of Children, Youth, and Families (DCYF), waxaa loogu talo geley in bulshada Washington ee waxbarashada dhallaanka uu la socodsiiyo si joogto ah dhamaan qaybaha shaqooyinka wanaagsan si ay u sameeyaan Hormarinta Xirfadlayaasha iyo Early Achievers.

---

## Wargeyskan...

- Waxaa nahay kooxda Workforce Growth, Quality, and Recognition Team
- Waad Mahadsantihiin Daryel Bixiyayaasha Caruurta
- Early Achievers Corner
- Kusoo biir casharada khadka tooska ah ee Juun: Early Achievers, Maxaa Isbadalay iyo Sabab
- Tababar Cusub Oo Loo Heli Kara Daryeel Bixiyeyaasha Ku Daryeela Goobaha Dabiiciiga ee Guri Dibadiisa ah
- Wax badan Ka Ogaw PACE!
- Ku Tukhasusitaanka Shahaado Mudada Gaaban ee cusub ee Washington State
- Isdiwaangalinta Furan ee Kulanka Northwest Early Learning and Pyramid
- Wax badan ka Ogaw Hormarinta Tayada Waxbarashada Caruurnimada Hore (Enhancing Quality of Early Learning, EQEL)
- Fair Start for Kids Act Corner: Habaynta Labada Luuqadood iyo Daryeelka Xog ogaalka ah ee Dhaawac Maskaxahaaneed
- Habaynta Labada Luuqadood
- Abaalmarinno loogu talagalay Tababbarka Daryeelka iyo Waxbarashada Xog ogaalka ahaaneed ee Dhaawac Maskaxahaaneed
- Goobta Tababarka cusub ee DCYF- La Daahfuri doono 2023!
- Taxanaha Casharada Khadka Tooska ah ee Guga
- Barnaamijka Tababarka iyo Tababarada Gobolku Ansixiyay

- Taageerada Shaqaalaha ECE ee Waxbarashada
- Deeqda Early Achievers Sheeqooyinka Guulaha
- Duubitaanka Waxbarasho Hadda way u fududahay Dadka qaata Deeqaha Early Achievers
- Rukumo Wargeeska PD
- Sidee Ayaynu Nahay?

---

# Waxaa nahay kooxda Workforce Growth, Quality, and Recognition Team




Waxaa laga yaabaa inaad ku aragtay tabeelada cusub ee ku yaal dhinaca sare ee fariinta wargeeskayaga. Waan ku faraxsanahay inaan ku dhawaaqno inaan yeelanay magac kooxeed cusub, waxaan nahay **Workforce Growth, Quality, and Recognition Team!**

Oktoobar 2022, qaar ka mid ah kooxaha waxbarashada hore ee Department of Children, Youth, and Families (DCYF) ayaa si wadajirah ugu soo biiray, kooxahan waxaa ka mid ah: Tababarka Early Achievers, Professional Development, iyo Kaabitaanka Daryeelka ilmaha. La jiranka, **Workforce Growth, Quality, and Recognition Team,** waanu sii wadi doonaa u adeegida bulshadeena waxbarashada hore iyo shaqaalaha.

Wadahadalo badan ka dib, tixgelin badanna ku tixgalinayna, waxaan ku faraxsanahay inaan ku degnay magac qeexaya shaqadayada wadajirka ah. Diiradayadu waxay sii wadaysaa taageeridda kobaca xirfadda iyo barashada xirfadlayaasha carruurnimada hore ee Washington.

Ku astaamee bogga hore ee horumarinta xirfadeed ee wargalinta waqtiga ugu badan:

Hormarinta Xirfada

## Waad Mahadsantihiin Daryel Bixiyayaasha Caruurta




Waxaan aqoonsannahay doorka udub dhexaadka ah ee aad ka ciyaareyso guusha iyo fayo-qabka caruurta, qoysaska iyo bulshada.

Inkasta oo Maalinta Mahadnaqa Daryeel Bixiyaha Carruurta la dhaafay, waxaan rabnay inaan dhahno waad ku mahadsan tahay shaqadaada adag iyo dadaalkaaga aad bixiso maalin kasta.

Waad mahasantahay, waana laguu mahadnaqayaa.

*Ka akhri cusboonaysiinta oo buuxda.*

## Early Achievers Corner

Qaybtan warsidaha ka mid ah waxay bixinaysaa macluumaadka wakhtiga ku haboon iyo wararka ku saabsan barnaamijka Early Achievers.

WASHINGTON EARLY ACHIEVERS
PREPARING CHILDREN FOR SUCCESS IN SCHOOL

## Kusoo biir casharada khadka tooska ah ee Juun: Early Achievers, Maxaa Isbadalay iyo Sabab



DCYF waxaa ka go'an inay wargaliso hirgelinta Early Achievers ee 2020 oo ay ka qeybgaliso daneeyayaasha iyo iskaashatada inta lagu jiro 2020 iyo 2021 si ay u hagto dib u eegistaas.

Dib u eegisyada Early Achievers waxay diirada saareen hababka fulinta oo kaliya, Heerarka Tayada Early Achievers ayaa ahaanaya sidii hore. Inta lagu guda jiro casharka khadka tooska ah waxaan si faahfaahsan ugu hadli doonaa waxyaabaha soo socda:

- Inaan ogaano sida ka qaybgalayaasha Early Achievers ay hadda u haystaan habab badan oo ay ku muujiyaan tayada barnaamijkooda oo ay u helaan jawaab celin milicsi ku salaysan
- Baro sida qaybaha Early Achievers ay isu beddeleen, iyo sidoo kale sidii ay ahaan jireen

**Khamiis, Juun 15 | 12-1 pm**

**Halkan iska diiwaangeli**

# Tababar Cusub Oo Loo Heli Kara Daryeel Bixiyeyaasha Ku Daryeela Goobaha Dabiiciiga ee Guri Dibadiisa ah



Ma tahay daryeel bixiye waxbarashada caruurnimada hore ee barnaamijka daryeelka goobaha dabiiciga ka baxsan guri (outdoor nature-based, ONB) mise danaynaysaa inaad wax badan ka ogaato barashada daryeelka goobaha dabiiciga ka baxsan guri (outdoor nature-based, ONB)?

DCYF waxay ku faraxsan tahay inay ku dhawaaqdo in tababar 10 saacadood ah la heli doono Goobta Tababarka Khadka Tooska ah ee DCYF xagaagan 2023. Tababarkan ayaa sidoo kale buuxin doona shuruudaha tababarka/waxbarashada gaarka ah ee ONB ee macalimiinta hogaanka ONB!

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan la xiriir merit@dcyf.wa.gov. Haddii aad hayso wax su'aalo ah oo ku saabsan daryeelka ilmaha ee goobaha dabiiciga ah ee guriga ka baxsan ee ruqsada haysta, la xiriir Kooxda ruqsad bixinta daryeelka Guriga ka Baxsan dcyf.outdoornaturebasedchildcare@dcyf.wa.gov.

---

# Wax badan Ka Ogaw PACE!

***Ma qabtaa wax su'aalo ah oo ku saabsan PACE?***

***Ma ogtahay in PACE ay kugu habboon tahay iyo in kale?***

***Ma doonaysaa inaad ogaato sida loo dhammeystiro PACE oo u dhiganta shuruudaha waxbarashada doorka shaqada?***




Hel jawaabaha su'aalahaaga oo wax badan ka ogaw PACE, oo ay ku jiraan sida loogu diiwaan geliyo tababbarada PACE adoo booqanaya bogga websaytkayagan PACE.

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan PACE, la xiriir kooxdayda MERIT.

**Bogga Websaytka PACE**

---

# Ku Tukhasusitaanka Shahaado Mudada Gaaban ee cusub ee Washington State



Washington's State Board for Colleges and Technical Colleges (SBCTC) waxay si rasmi ah ugu dartay "Shahaadada Mudada Gaaban ee Waxbarashada Fasalka ka baxsan ee Washington State" liiska shahaadooyinka mudada gaaban ee la heli karo.

## Yaa loogu talagalay midan?

Takhasusitaanka shahaadooyinka mudada gaaban ee ECE ee Washington State ayuu heli karaa qof kasta oo xiisaynaya, oo ay ku jiraan kuwa ka shaqeeya jawi waxbarasho oo ku salaysan dabeecada dibadda.

## Sideen ku heli karaa shahaado mudo gaaban qaadanaysa?

Marka lagu daro dhammaystirka ECED& 115 Koriinka Ilmaha, waxaad u baahan doontaa inaad dhammaystirto ECED& 137 Waxbarashada Dibadda si aad u kasbato takhasuskan.

## Goorma ayay midan la heli karaa?

Kooraskan iyo takhasuskan ayaa la heli doonaa laga bilaabo rubuci deyrta waxaana lagu bixin doonaa kulliyadaha bulshada iyo farsamada ee gobolka oo dhan.

Adeegso Bogga Qorshaynta Shaqada ECE si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loola xidhiidho kulliyad kuu dhow.

**Bogga Qorshaynta Xirfada Shaqada ee ECE**

---

# Isdiwaangalinta Furan ee Kulanka Northwest Early Learning and Pyramid



Kulanaka Northwest Early Learning and Pyramid Model ee 2023 waxay ku casuuntaa maamulayaasha ilmanimada hore, tababarayaasha, khabiirada akhlaaqda, barayaasha iyo kooxaha gobolka inay isugu yimaadaan waxbarasho qoto dheer iyo isku xidhid si kor loogu qaado horumarka shucuureed ee carruurta yaryar iyo sinnaanta waxbarashada hore.

### Faahfaahinta Shirarka

- Taariikhaha Shirka hore: Noofeembar 6-7, 2023
- Taariikhaha Shirka: Noofeembar 7-8, 2023
- Goobta: Seattle Airport Marriott, Seattle, WA

Wixii xog dheeraada, booqo websaytka University of Washington's, College of Education

**Kulanka Northwest Early Learning and Pyramid Summit**

---

# Wax badan ka Ogaw Hormarinta Tayada Waxbarashada Caruurnimada Hore (EQEL)



## Waa maxay EQEL?

- Kobcinta tayada Waxbarashada Hore, ama EQEL, waa tababar 20-saacadood ah kaas oo la dhammayn karo muddo laba sano ah.
    - EQEL ayaa la dhammeeyaa kadib Waxyaabaha Aasaasiga ah Daryeelka Ilmaha waana in lagu dhameeyaa saddex sano gudahood laga bilaabo marka la shaqaaleysiiyo ama loo dallacsiiyo door u baahan tababarka EQEL.
- EQEL waxay buuxin doontaa shuruudaha tababarka shaqada ee sanadlaha ah.
- Sannadka 1aad ee tababarku wuxuu ka kooban yahay 10 saacadood ee ugu horeeya EQEL, oo ay ku jiraan Daryeel Bixinta iyo Dhisida Maskaxda.
- Sanadka 2aad ee EQEL wuxuu ka kooban yahay 10ka saacadood ee labaad ee taxanahan, oo ay ku jiraan Ka qaybgalka Isdhexgalka iyo Deegaanka, iyo Taageerada Dhaqanka Wanaagsan.

## Sideen u heli karaa tobobarkan?

- Daryeel bixiyayaashu waxay isticmaali karaan badhanka "Find Training" ee MERIT.
- Kooxaha khadka tooska ah ayaa laga heli karaa Bogga tabarka Khadkatooska ahee DCYF ee isdiwaangalinta shakhsi ahaaneed.

## Yaa dhamaysta tabobarkan?

- Daryeel bixiyeyaasha waxbarashada caruurnimada hore ee la shaqaaleysiiyay kadib Agoosto 1, 2019 oo ku jira doorka kaaliyaha macalinka, hogaamiyaha macalinka, shatiga guriga qoyska, kormeeraha barnaamijka, iyo agaasimaha xarunta ayaa u baahan doona inay dhamaystiraan tababarkan.
- Daryeel bixiyeyaasha waxbarashada caruurnimada hore ee la shaqaaleysiiyay kahor Agoosto 1, 2019 oo raba inay la kulmaan waxbarashadooda doorka shaqo ee PACE waa inay dhammaystiraan EQEL.

## Maxaa kale oo buuxin doona shuruudaha tababarka EQEL?

Ikhtiyaarada kale ee soo socda ayaa la buuxin doona EQEL marka lagu diwaangaliyo MERIT:

- Shahaadada mudadan gaabab ee ECE ee Washington State (takhasus kasta)
- Shahaada ECE ee Washington State

- Shahaadada Jamacadeed ee ECE ama ka sare
- Waxbarasho/shahaadooyinka u dhigma ee shahaadada mudada gaaban ee DCYF ee ECE ee State Washington ka sareeya
    - Ka eeg hagitaanka Ikhtiyaarada Waxbarasho ee u Dhigma tusaalaha liiska waxbarashada/shahaadada u dhigma.
    - PACE iyo ikhtiyaarada khibrad ahaaneed u dhigma ma aha beddelka u qalmitaanka buuxinta EQEL.
- Head Start, ECEAP, and School District Partnerships

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan EQEL, ka fiiri bogga internetka ee Shuruudaha Tababarka:

**Shuruudaha bogga Tababarka**

---

## Fair Start for Kids Act Corner: Habaynta Labada Luuqadood iyo Daryeelka Xog ogaalka ah ee Dhaawac Maskax ahaaneed




Kooxda Workforce Growth, Quality, and Recognition waxay leedahay laba qaybood oo waaweyn oo ah Fair Start for Kids Act (FSKA) kuwaas oo taageera horumarinta tayada daryeelka ilmaha ee Washington iyada oo loo marayo shaqada caruurnimada hore, waa Habaynta Labada Luuqad iyo Daryeelka Xig-ogaal ahaaneed Dhaawaca Maskax ahaaneed Si aad wax badan uga ogaatid booqo:

**Bogga Websyatka Hindisayaaasha hadda**

---

# Habaynta Labada Luuqadood



Early Achievers Dual Language Designation waxay aqoonsata barnaamijyada taageera carruurta iyo qoysaska ku hadla luqadaha badan ee jawiga barashada luqadaha.

Magacaabistu waxay ka caawin doontaa qoysaska inay helaan xannaano carruursi ay u daboolaan afkooda iyo dhaqamada ay ku wanaagsan yihiin.

## Yaa heli kara habaynta Labada Luuqadood?

- Barnaamijyada ka qaybgalaya Early Achievers waxay heli karaan habaynta Labada Luuqadood.
- Barnaamijyada danaynaya waxay ballan qaadi doonaan inay buuxiyaan Heerarka Labada Luuqadood iyo Dhaqamada ugu Fiican.
- Barnaamijyada tilmaamaya u heelanaantooda ayaa muujin doona dhaqamadooda inta lagu jiro Wareegga Early Achievers Quality Recognition

## Waa maxay Abaal-marinta Habaynta Labada Luuqadood?

Fair Start for Kids Act oo maamusho DCYF si ay u dhisto Abaalmarinta Naqshadeynta Labada Luuqad ee bixiyeyaasha u qalma si ay u dhisaan iyo/ama u xoojiyaan taageerada luqadda ee jawiga waxbarashada.

Abaalmarinnada maalgelinta Habynta Labada Luuqad ayaa heli karaan

- Barnaamijyada Early Achievers ee aqbalaya kabitaanka daryeelka ilmaha. Tani waxay ka dhigan tahay in barnaamijku uu dalbaday lacag-bixin 12 bilood ee la soo dhaafay.
- ECEAP iyo Qandaraaslayaasha Hore ee ECEAP

Maalgelinta waa xadidan tahay waxaana la kala mudnaan siin doonaa iyadoo lagu salaynayo Arimaha Dejinta Koodhka Boostada Daryeelka Ilmaha.

## Goorma ayaa la heli doonaa Habaynta Labada Luuqadood?

Daryeel bixiyeyaasha waxay codsan karaan Habaynta Labada Luuqadood wakhti kasta. Codsoiga waxaa laga heli karaa CECI, Washington's Coach and Educator Community Interface (horay loogu yaqaanay Coaching Companion).

## Su'aalo?

daryeel bixiyeyaasha waxaa lagu dhiirigelinayaa inay tababarahooda kala shaqeeyaan nidaamka codsiga. Providers can also contact our team QRIS. Si aad wax badan uga ogaatid booqo:

**Websaytka Barashada Labada Luuqad ee DCYF**

# Abaalmarinno loogu talagalay Tababbarka Daryeelka iyo Waxbarashada Xog ogaalka ahaaneed ee Dhaawac Maskax ahaaneed



Sida lacagaha la heli karo, DCYF waxay bixin doontaa abaal-marin lacageed oo hal mar ah, ilaa $1,200, shaqsiyaadka xaqa u leh ee leh aqoonta iyo xirfadaha lagu wargeliyay dhaawaca ee laga helay tababbarka iyo waxbarashada ay DCYF aqoonsan tahay ee lagu xaqiijiyay MERIT.

**Tababarada**

Si aad u hesho liiska DCYF aqoonsatay tababbarada daryeelka xog ogaal ahaaneed dhaawacyada askax ahaaneed, booqo DCYF Trauma-Informed Care Trainings.

Si aad wax walba uga ogaato abaal marinaha daryeelka xog ogaal ahaaneed dhaawaca maskax ahaaneed, booqo:

**Bogga websaytka daryeel xog ogaal ahaaneed ee dhaawac Maskax ahaaneed**

# Goobta Tababarka cusub ee DCYF- Waxaa la qabanayaa 2023!



Goobta Tababarka Cusub ee DCYF ayaa la daah-furaya dhawaan 2023 waxana ay bedeli doontaa LMS ka hadda jira, DCYFtraining.com.

Waanu sii wadi doonaa bixinta wararka xaalada marka lagu dhawaado daah-furitaanka.

Macluumaadkii ugu dambeeyay, oo ay ku jiraan cusboonaysiinta xaaladda bishii, booqo:

**Goobta Tababarka Cusub ee DCYF**

## Taxanaha Casharada Tooska ah ee Xagaaga



Taxanaha casharada Khadka Tooska ah ee guga ayaa bilaabmay Abriil. Haddii aad seegtay casharada khadka tooska ah, waxaad ka heli kartaa duubitaankayaga boga websaytka casharada khadka tooska ah.

- **Abril**: Abaalmarinno maaliyadeed Daryeelka Xog ogaalka ahaaneed ee Dhaawac Maskax ahaaneed
- **Maayo**: Tirada Badel ahaaneed ee Washington
- **Juun**: Early Achievers, maxaa is badelay iyo Sababta
    - **Ingriis**: Khamiis, Juun 15 abaare 12 pm | Isu diwaangalinta Zoom
    - **Isbaanish**: Talaado, Juun 13 abaare 6 pm | Isu diwaangalinta Zoom
    - **Soomaali**: Sabti, Juun 17 abaare 11 pm | Isu diwaangalinta Zoom

**Markaad isdiiwaangelinayso, fadlan hubi inaad qorto cinwaanka iimaylka oo sax ah, haddii kale ma heli doontid macluumaadka diiwaangelinta Zoom.**

*Haddii aadan heli karin casharka khadka tooska ah, waxay u badan tahay inaan ka shaqeyneyno duubista oo aan soo galino.* Haddii aad su'aalo gaar ah ka qabto casharka khadka tooska, iimayl u dir Marlene White.

---

## Barnaamijka Tababarka iyo Tababarada Gobolku Ansixiyay



Ma waxaad tahay tababare ama ma xiisaynaysaa inaad wax badan ka ogaato barnaamijka Tababarka ee Gobolka-Washinton uu ansixiyay? Wargeeska Kobcinta Shaqada ee ugu dambeysay waxaa loogu talagalay Tababarayaasha uu Gobolku ogolaaday.

Liis dhammaystiran oo ku saabsan Wargeysyada (Newsletters) Growing the Workforce waxaa laga heli karaa bogga Wargeysyada DCYF:

**Bogga websaytka Wargeeska**

---

# Taageerada Shaqaalaha ECE ee Waxbarashada

DCYF way garanaysaa qiimaha waxbarashada iyo shaqooyinka loo igmanayo cida lala shaqeeyo ee bulshada waxbarashada sare si loo qaabeeyo oo loo buuxiyo barnaamijyo waxbarasho oo kala duwan iyo deeqaha waxbarashada si loogu taageero shaqaalaha waxbarashada dhallaanka. Si aad ula socoto Xogaha barnaamijyadaan iyo waxbarashada kale, booqo:



[Deeqa waxbarashada, kaalmooyinka, iyo abaalmarinada]

---

# Deeqda Early Achievers Sheeqooyinka Guulaha



*"Xarunteenu waa bogga Early Achievers waxaanan ka faa'iidaysanay deeqda dugsiga waqti hore, waxaana hadda ku haynaa shaqaale isticmaalaya lacagta deeqda sadexda bilood ah.*

*Shuruudaha WAC ee hadda jira, macalimiinteenu waxay u baahan yihiin inay haystaan Shahaadada bilowga ah ama shahaado Gaaban. Shahaadada ay u baahan yihiin waxay kuxirantahay haddii ay yihiin kaaliyaha macalin ama macalinka hogaanka ah. WAC sidoo kale waxay uga baahan tahay qof ku sugan xaruntaada inuu haysto ECE Shahaado. WAC sidoo kale waxay uga baahan tahay qof ku sugan xaruntaada inuu haysto ECE* ***Waanu ku mahadinay in aanu helno deeq u ogolaanaysa macalimiinteena in ay aadaan dugsiga si ay u buuxiyaan shuruudahaas. Tani waxay u ogolaanaysaa inay sii shaqeeyaan iyaga oo aan wax amaah ah ka qaadan ama jeebkooda ka bixin dugsiga uu gobolku uga baahan yahay inay u qaataan si ay uga shaqeeyaan xarunta daryeelka caruurta.***

*Fadlan sii wad in aad siisid maalgalinta loo baahan yahay in lagu caawiyo macalimiinteena, kaliya maahan in ay ilaashadaan shaqadooda, balse noqda macalimiin wanaagsan adiga oo baranaya waxa ka dhigaya caruurta sida ay yihiin iyo in aan barano xirfado badan si aan u barano caruurta aan daryeelno. Mahadsanid.:"*

**-Tabitha, Kaaliyaha Agaasimaha**

---

# Duubitaanka Waxbarasho Hadda way u fududahay Dadka qaata Deeqaha Early Achievers

Waxaan ku faraxsanahay inaan ku dhawaaqno wargalinta daryeel bixiyeyaasha ee caruurta ee Deeqaha Early Achievers. Habka la cusboonaysiiyay waxa uu yareeyaa walbahaarka iyo wakhtiga daryeel bixiyayaasha.



### Duubitaanka Waxbarasho Hadda way u fududahay!

Ardayda/daryeel bixiyaasha ku jira deeqda Early Achievers (EAG) uma baahnaan doonaan inay soo gudbiyaan dukumeentiga waxbarashada dhammaatay ee MERIT. Sida ka faa'iidaystaha Deeqaha Early Achievers, xogta dhamaystirka si toos ah ayaa loo diri doonaa DCYF. Marka xogta ay hesho DCYF, Takhasusle Aqoon u leh Shahaado bixinta ee DCYF ayaa diiwaangelin doona waxbarashada la dhammeeyey isagoo ka wakiil ah bixiyeyaasha, ka xorayn doona bixiyeyaasha inay tallaabadan sameeyaan.

### Waxyaabaha Ku saabsan Deeqda Early Achievers

Deeqda Early Achievers waa barnaamijka kaalmada dhaqaale ee ardayga ay bixiso DCYF si ay uga caawiso bixiyeyaasha xanaanada cunugga ee shaqeeya iyo barayaasha waxbarashada hore inay dhammaystiraan shahaadooyinka iyo shahaadooyinka jamacadeed ee waxbarashada caruurnimada hore.

Baro fursadaha maalgelinta ee aad adigu heli karto adiga oo soo booqata websaytkayaga Deeqaha Waxbarasho, Deeqaha & Abaalmarinta. Su'aalaha ku saabsan habkan, ama sida loo soo gudbiyo shahaadadaada caalamiga ah, iimayl u dir MERIT.

---

## Noo Sheeg Sheekadaada

Waxaan jecelnahay inaan maqalno sheekooyinka guusha, waxay na siinayaan rajo iyo dhiirigelin!

Miyaad heshey deeqda Early Achievers oo ma doonaysaa inaad noo sheegto sheekadaada?




Waxa aad sheekadaada kusoo dirtaa Takhasuslaha Waxbarashadeena Waxbarashada Dhallaanka, Sharene Leek, si loogu daro wargeyska soo socda.

---

## Rukumo Wargeeska PD

*Growing the Workforce* waa kheyraad loogu talagalay dhammaan shaqsiyaadka ku jira ganacsiga gaarsiinta taakuleyn waxbarasho xirfadeed shaqaalaha waxbarashada hore.

*Wargeeska PD* waxaa loogu talagalay inuu la socodsiiyo bulshada waxbarashada dhallaanka ee Washington dhamaan shaqooyinka ee la xariira Hormarka Xirfadaha.

**Rukumo**

*Liiska fariimaha oo dhameystiran waxaa laga heli karaa bogga Wargeesyadayada.*

---

# Sidee Ayaynu Nahay?



Fadlan nala soo socodsii sida aan u sameyneyno samaynta degdeg ah xog aruurin saddex-su'aal ah.

Hadii aad ka qabto su'aalo ama aad nala socodsiinayo mawduuc waxa aad la xiriir Marlene White.